

<b>JAMHUURIYADDA</b>		<b>SOMALILAND</b>
<b>FAAFINTA RASMIGA AH</b>		
<b>SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE</b>	الْجُمْهُورِيَّةُ لْجُمْهُورِيَّةُ صَوْمَالِيْلَانْدُ	
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL, HARGEYSA E-mail: <a href="mailto:Garyaqaankaquud@gmail.com">Garyaqaankaquud@gmail.com</a>		
Sanadka: 4aad	Cadadka: 4aad ee April	Taariikh: 02/05/2015
<b>QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.</b> <b>RUKUNKA (Subscription):</b>		
<i>QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.</i>		

**TUSMADA CADADKA**

<p><b><u>QAYBTA KOWAAD: XEERARKA</u></b> <b>BAARLAMAANKA IYO XEER</b> <b>NIDAAMIYAYAASHA:</b></p> <p>1) <b>SIXID:</b> Qod. 2aad, Qod. 7aad, Qod. 25(2)aad, Qod 26(2)aad, Qod.28aad, Qod 42aad iyo Qod 44(3)aad ee Wax-beddelka iyo Kaabista Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha, Xeer Lr. 37/2007.</p>	<b>201</b>
<p><b><u>QAYBTA LABAAD: XEER</u></b></p>	<b>205</b>
<p><b>NIDAAMIYAYAASHA</b></p>	<b>206</b>
<p style="text-align: center;"><b>IYO</b></p>	<b>207</b>
<p><b>DIKREETOoyinka</b></p>	<b>209</b>

## MADAXWEYNAHA:




- |   |                   |
|---|-------------------|
| 2) <u>XEER MADAXWEYNE Lr:</u><br><u>0474/032015</u><br>Magacaabid,  | 211<br>212<br>213 |
| 3) <u>XEER MADAXWEYNE Lr:</u><br><u>0476/032015</u><br>Magacaabid,  | 214               |
| 4) <u>XEER MADAXWEYNE Lr:</u><br><u>0477/032015</u><br>Magacaabid,  | 216               |
| 5) <u>XEER MADAXWEYNE Lr:</u><br><u>0485/042015</u><br>Ku-dhawaaqidida Diiwaangelinta Cod-<br>bixiyayaasha, | 220               |
| 6) <u>XEER MADAXWEYNE Lr:</u><br><u>0487/042015</u><br>Magacaabid,  |                   |
| 7) <u>XEER MADAXWEYNE, Xilka</u><br><u>Qaadis 31/03/15</u>  | 223               |
| 8) <u>XEER MADAXWEYNE, Xilka</u><br><u>Qaadis 31/03/15</u>  | 224               |
| 9) <u>XEER MADAXWEYNE, Xilka</u><br><u>Qaadis 22/03/15</u>  | 226               |
| 10) <u>XEER MADAXWEYNE Lr:</u><br><u>0489/042015</u><br>Xilka Qaadis  | 227<br>228        |

**QAYBTA SADEXAAD: DIGREETOYINKA,**

**WAREEGTOOYINKA, AMARADA & XEER**

**NIDAAMIYAYAASHA**

**WASIIRADA, IWM**



- |  |            |
|--|------------|
| 11) XEER WASIIR,<br>Fulin Go'aano kasoo baxay Gudiga<br>Cadaaladda,<br>Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha<br>Garsoorka | 232        |
| 12) XEER WASIIR,<br>Fulin Go'aano kazoo baxay Gudiga<br>Cadaaladda,<br>Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha<br>Garsoorka | 233<br>235 |

**QAYBTA AFRAAD: AMARADA &**

**GO'AANADA MAAMUL**

- |  |            |
|--|------------|
| 13) Diiwaan Gelin Shirikada Saabir<br>General Tading Company,<br><u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>                                | 237<br>238 |
| 14) Diiwaan Gelin Shirikada Dhamac<br>Construction Company,<br><u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>                                  | 240        |
| 15) Diiwaan Gelin Shirikada Horn Aviation<br>Service,<br><u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>  | 241        |
| 16) Diiwaan Gelin Shirikada Travel and<br>Tourism agency,<br><u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>                                    | 243        |
| 17) Diiwaan Gelin Shirikada Hargeisa<br>Canadian medical Center & Canadian<br>Dental Clinic,<br><u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u> | 244<br>246 |
| 18) Diiwaan Gelin Shirikada Iftin Water<br>Supply Company,<br><u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>                                   |            |

- 19) Diiwaan Gelin Shirikada Bright Company,  
Xafiiska Xeer Illaalinta Guud
- 20) Diiwaan Gelin Shirikada Maydi Frankin  
cense Natural oil (LLC),  
Xafiiska Xeer Illaalinta Guud
- 21) Diiwaan Gelin Shirikada Al-Jamiil  
Group for building & electric materials  
Trading,  
Xafiiska Xeer Illaalinta Guud
- 22) Diiwaan Gelin Shirikada Blue field  
mining Company,  
Xafiiska Xeer Illaalinta Guud
- 23) Diiwaan Gelin Shirikada Maalsan  
Financial Services LTD,  
Xafiiska Xeer Illaalinta Guud
- 24) Diiwaan Gelin Shirikada Heemaal  
Construction and Contracting  
Company,  
Xafiiska Xeer Illaalinta Guud
- 25) Diiwaan Gelin Shirikada Bubal  
General Trading Company,  
Xafiiska Xeer Illaalinta Guud
- 26) Diiwaan Gelin Shirikada Toyota  
Somaliland Company (Ts)  
Xafiiska Xeer Illaalinta Guud
- 27) Diiwaan Gelin Shirikada S3 Atuomotiv  
LTD,
- 28) Joojin Damiin Qadis eedayanayaasha  
loo haysto dembiyo Qaranku ku dhiban  
yahay, Maxkamadda Sare
- 29) Amar Xayiraad ka Qadis (3) Guri No:  
Maxkamadda Gobolka Hargeysa



## **QAYBTA SHANAAD: OGEYSIISYADA**

*Sooma bixin*

**QAYBTA KOWAAD:**  
**XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER**  
**NIDAAMIYAYAASHA:**



**SIXID: Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka  
Diiwaangelinta Codbixiyaaha Xeer Lr. 37/2007**

Nuqulkii Xeerka Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Diiwwangelinta Codbixiyaaha Xeer Lr. 37/2007 ee ku soo baxay Faafinta Rasmiga, Sanadka 3aad, Cadadka 12aad ee 03/01/2015 waxaa la saxay qodobadan iyo erayadan hoos ku qoran:

**Qodobka 2aad-**  
**Eraybixinta**

**“Diiwaanka:** - wuxuu u qorna sidan ‘waxa loola jeedaa diiwaanka lagu qoro magacyada codbixiyaasha ee goob doorasho kasta”.

**Sixiddu** waxa weeye sidan: “Waxa loola jeedaa diiwaanka lagu qoro xogta muwaadiniinta warada aqoonsiga iyo codbixiyaasha ee goob doorasho kasta.”

**“Diiwaanka Guud:** - wuxuu u qornaa sidan “waxa loola jeedaa diiwaanka dhexe ee la dhigo xarunta komishanka doorashooyinka kasoo lagu kaydiyo dhamaan magacyada codbixiyeyaasha Qaranka Somaliland.

**Sixiddu** waxa weeye sidan: “Waxa loola jeedaa diiwaanadda dhexe ee la dhigo xarunta Wasaarada

Arrimaha Gudaha iyo Komishanka Doorashooyinka, kuwaas oo lagu kaydiyo dhammaanba xogta Muwaadiniinta iyo Codbixiyayaasha”



**Qodobka 7aad:**

Cinwaanka Qodobkan **7aad** waxa uu u qorna sidan “kaydinta Diiwaangelinta”.

**Sixidda** Cinwaankuna waxa weeye sidan:

“Kaydinta Diiwaangelinta iyo soo saarista Liisaska kama dambaysta ah”

**Qodobka 25aad:**

**Diiwaan-galinta Codbixiyayaasha**

Qodobka **25aad**, Faqraddiisa **2aad** waxay u qorneyd sidan: “Hadii ay dhacdo in Muwaadiniinta qaarkood ay suurto-galin waydo in ay hore usii qaataan Wasaarada aqoonsiga Muwaadinka, waa in Wasaarada Arrimaha Guduhu ku sugtaa Muwaadinnimadooda goobta qaadaashada kaadhka codbixiyaha”

**Sixiddu** waxa weeye sidan “Hadii ay dhacdo in muwaadiniinta qaarkood ay suurto-galin waydo in ay hore u sii qaataan Warqadda aqoonsiga Muwaadinka, waa in Wasaarada Arrimaha Guduhu ku sugtaa Muwaadinnimadooda goobta qaadashada kaadhka codbixiyaha”

**Qodobka 26aad:**

**Habka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha**

Qodobka **26aad**, Faqraddiisa **2aad** waxay u qorneyd sidan: “Liiska diiwaanka codbixiyaha waxa soo saaraya Komishanka Doorashooyinka Qaranka laba bilood ka hor xilliga Doorashada”

**Sixiddu** waxa weeye sidan “Liiska diiwaanka coodbixiyayaasha waxa soo saaraya Komishanka Doorashooyinka Qaranka Lixbilood (6) ka hor xilliga doorshada.



**Qodobka 28aad:**

**Ku Dhawaaqidda Diiwaangelinta Codbixiyayaasha**

Qodobka **28aad** wuxuu u qornaa sidan: “Komishanka Qaranka ayaa ku dhawaaqaya xilliga la bilaabayo Diiwaangelinta Codbixiyayaasha marka ay tashadaan Axxaabta Qaranka, waxayna ku wargelindoonaan Madaxweynaha JSL”.

**Sixiddu** waxa weeye sidan “Madaxweynaha ayaa ku dhawaaqaya xilliga la bilaabayo diiwaangelinta Codbixiyayaasha, isaga oo ku soo saaraya Xeer Madaxweyne, ka dib marka uu helo soo-jeedinta Komishanka Doorashooyinka Qaranka mudo shan iyo tobban maalmood gudahood oo ka bilaabanta marka uu helo soo-jeedinta”.

**Qodobka 42aad:**

**Goob-Joogayaasha**

Qodobka **42aad**, wuxuu u qornaa sidan “Goobjoogayaasha ama Kormeerayaasha Caalamiga iyo kuwa maxaliga ah ee hubinaya habsami u socodka hawlaha diiwaangelinta Codbixiyayaasha, waxa ogolaanaya Komishanka Doorashooyinka Qaranka isagoo xaga amaanka kala kaashanaaya Wasaarada Arrimaha Gudaha”.

**Sixiddu** waxa weeye sidan “Goob-joogayaasha ama Kormeerayaasha Caalamiga iyo Kuwa maxaliga ah ee hubinaya habsami u socodka hawlaha diiwaan-

gelinta cod-bixiyayaasha, waxaa wasaaradda Arrimaha Gudaha u soo gudbinaya Komishanka Doorashooyinka Qaranka, si ay go'aan uga gaadho ogolaansha dal ku galka".




**Qodobka 44aad:**  
**Ciqaabta Xadgudubka**


Qodobka **44aad**, Faqraddiisa **3aad** waxay u qorneyd sidan: “Qof kasta oo aan ahayn muwaadin Somalilander ah oo isku daya inuu is diiwaan geliyo wuxuu mutaysanayaa ciqaab dhan 5 bilood oo xadhig ah, 2milyan oo ganaax lacageed ah iyo dalka oo laga mustaafiyo marka uu dhameysto mudada xadhiga ah”.

**Sixiddu** waxa weeye sidan “Qof kasta oo aan ahayn muwaadin Somalilander ah oo isku daya inuu is diiwaan geliyo wuxuu mutaysanayaa ciqaab dhan 5 bilood oo xadhig ah oo aan iib lahayn, 2milyan oo ganaax lacageed ah iyo dalka oo laga mustaafiyo marka uu dhameysto mudada xadhiga ah”.





**QAYBTA LABAAD:**  
**XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO**  
**DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:**

**REPUBLIC OF**  **SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-3111/032015

DATE....22/03/15

**XEER MADAXWEYNE Lr:0474/032015**

## Magacaabid

### Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Dastuurka  
Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka  
Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay  
Guddoomiyeyaasha Gobolladu u  
leeyihiin dhismaha Qaranka;
- Markuu Aqoonsaday: In baahi loo qabo buuxinta  
jagada Guddoomiye Ku-Xigeenka  
Gobolka Awdal ee  
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu La Tashaday:


Madaxda ay hawshani khusayso;

Markuu Ka Fiirsaday:

Kartidiisa, aqoontiisa iyo  
hufnaantiisa shaqo

Markuu Ku Qancay:

In uu hanan karo xilkan loo  
magacaabay;



### **Wuxuu go'aamiyey**

In Mudane, Axmed Diiriye Cabdilaahi, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Gudoomiye Ku-xigeenka Gobolka Awdal ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF**



**SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-3128/032015

DATE....31/03/15

**XEER MADAXWEYNE Lr:0476/032015**

## **Magacaabid**


**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay:

Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad,  
Xarafka (r) ee Dastuurka  
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyey:

Ahmiyadda Somaliland u fadhiya dalalka dibaddu u leeyihin dhismaha Qaranka;



Markuu Arkay:

In baahi loo qabo buuxinta jagada Wakiilka Jamhuuriyadda Somaliland u fadhiya Dalka Kenya;

Markuu Ka Fiirsaday:

Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

Markuu Ku Qancay:

In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

**Wuxuu go'aamiyey**

In Mudane, Cali Xuseen Ismaaciil Jirde, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wakiilka Jamhuuriyadda Somaliland u fadhiya dalka Kenya.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF**  **SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-3129/032015

DATE....31/03/15

**XEER MADAXWEYNE Lr:0477/032015**

**Magacaabid**

## **Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**



- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, Xarafka (r) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda Wakiiladda Somaliland u fadhiya dalalka dibaddu u leeyihiin dhismaha Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Wakiilka Jamhuuriyadda Somaliland u fadhiya Dalka Jabuuti;
- Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;
- Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

### **Wuxuu go'aamiyey**

In Mudane, Maxamed Warsame Cali Cigaal, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wakiilka Jamhuuriyadda Somaliland u fadhiya dalka Jabuuti.


Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF**  **SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

**XEER MADAXWEYNE Lr:0485/042015**



## **Ku-dhawaaqidda Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha**

### **Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 28aad ee Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha Xeer Lr.37/2007;
- Markuu Arkay: Soo jeedinta Guddida Doorashooyinka Qaranka ee summadeedu tahay KDQ/XK/405/2015, ee ku taariikheysan 09/04/2015 iyo lifaaqa la socda ee ay ku caddahay muddada Diyaarinta Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha iyo Muddada Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha;
- Markuu Tixgeliyay: Ahamiyadda Diiwaangelinta Cod-bixiyayaashu u leedahay in la qabto Doorasho xor ah oo xalaal ah;

**Wuxuu Soo Saaray**

Xeerkan oo lagu go'aamiyey in Diiwaangelinta Cod-bixiyayaashu ka bilaabanto Gobollada Dalka Jamhuuriyadda Somaliland taariikhdu marka ay tahay 21/07/2015.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



**REPUBLIC OF**  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3183/042015

DATE....14/04/15

**XEER MADAXWEYNE Lr:0487/042015**

## **Magacaabid**

### **Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad ee xarafka (kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tix-geliyey: Ahmiyadda Wakaaladda Qurbjoogga Qaranku u leedahay Dalka iyo dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Guddoomiyaha Wakaaladda Qurbajoogga Qaranka ee Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Ka Fiirsaday:

Kartidiisa, aqoontiisa iyo  
hufnaantiisa shaqo

Markuu Ku Qancay:

In uu hanan karo xilkan loo  
magacaabay;



**Wuxuu go'aamiyey**

In Mudane, Cabdi Cabdilaahi Xirsi, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Guddoomiyaha Wakaaladda Qurbajoogga Qaranka ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Xafiiskaa oo hoos imanaaya maamulka Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF**  **SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/1-3130/032015

DATE....31/03/15

**Ku: Mudane, Maxamuud Cabdilaahi Jaamac  
(Sifir), Wakiilkii Somaliland ee Hore ee dalka  
Kenya Nairobi**

**Og: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda  
iyo Iskaashiga Caalmiga ah Hargeysa**

**Ujeedo:**

**Xil Ka-qaadis**



Mudane,

Waxa aan aad kuugu mahadinayaa mudadii aynu wada shaqaynaynay. Xilalka Qaranka ayey dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaa darteed, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Wakiilka Jamhuuriyadda Somaliland u fadhiya Dalka Kenya.

Haddaba, waxaan kaa rajaynayaa in si niyad sami ah aad ugu wareejiso xilka aad haysay Mudane, Cali Xuseen Ismaaciil Jirde, oo aan xilkaa isaga ah u magacaabay.

Sidoo kale, waxaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah, oo ay warqadani ogeysiin ugu socoto, la farayaa in uu labada masuul u kala wareejiyo xilka Wakiilka Jamhuuriyadda Somaliland u fadhiya Dalka Kenya.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF**  **SOMALILAND**  
**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/1-3131/032015

DATE....31/03/15

**Ku: Mudane, Maxamed Xirsi Qalinle,**



**Wakiilkii Somaliland ee Hore ee dalka Jabuuti  
Jabuuti**



**Og: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda  
iyo Iskaashiga Caalmiga ah  
Hargeysa**

**Ujeedo: Xil Ka-qaadis**

Mudane,

Waxa aan aad kuugu mahadinayaa mudadii aynu wada shaqaynaynay. Xilalka Qaranka ayey dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaa darteed, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Wakiilka Jamhuuriyadda Somaliland u fadhiya Dalka Jabuuti.

Haddaba, waxaan kaa rajaynayaa in si niyad sami ah aad ugu wareejiso xilka aad haysay Mudane, Maxamed Warsame Cali Cigaal, oo aan xilkaa isaga ah u magacaabay.

Sidoo kale, waxaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah, oo ay warqadani ogeysiin ugu socoto, la farayaa in uu labada masuul u kala wareejiyo xilka Wakiilka Jamhuuriyadda Somaliland u fadhiya Dalka Jabuuti.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT



JSL/M/XERM/1-3119/032015

DATE....22/03/15

**Ku: Mudane, Cabdiraxmaan Nuur Sugaal,  
Guddoomiye Ku-xigeenkii Hore ee  
Gobolka Awdal ee JSL**

**Boorama**

**Og: Guddoomiyaha Gobolka Awdal ee JSL  
Boorama**

**Og: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha  
Hargeisa**

**Ujeedo: Xil Ka-qaadis**


Mudane,

Waxa aan aad kuugu mahadinayaa mudadii aynu wada shaqaynaynay. Xilalka Qaranka ayey dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaa darteed, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Guddoomiye Ku-xigeenka Gobolka Awdal ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Haddaba, waxaan kaa rajaynayaa in si niyad sami ah aad ugu wareejiso xilka aad haysay Mudane, Axmed Diiriye Cabdilaahi, oo aan xilkaa isaga ah u magacaabay.

Sidoo kale, waxaa Guddoomiyaha Gobolka Awdal, oo ay warqadani ogaysiin ugu socoto, la farayaa in uu labada masuul u kala wareejiyo xilka Guddoomiye ku-xigeenka Gobolka Awdal ee Jamhuuriyadda Somaliland.



Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF**  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/1-3197/042015

DATE....18/04/15

**XEER MADAXWEYNE Lr:0489/042015**

**Xil Ka Qadis**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka  
Jamhuuriyadda Somaliland;


Markuu Arkay: Qodobka 105aad, Faqradiisa  
3aad ee Dastuurka  
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Warbixintii iyo talo soo jeedintii  
Guddida Cadaaladda, taasoo  
tilmaamaysay in ay adagtahay  
wada shaqaynta Gudoomiyaha

Maxkamadda Sare iyo Garsoorka  
Dalka;

Markuu Arkay:

Cabashooyinka is-dabajoogga ah  
ee dadweynuhu ka muujiyeen  
Guddoomiyaha Maxkamadda  
Sare iyo Garsoorka Dalka;



Markuu Yaqiinsaday:

In loo baahan-yahay isbeddel  
lagu sameeyo Garsoorka iyo  
Cadaaladda Dalka;

### **Wuxuu Go'aansaday**

In laga bilaabo taariikhda maanta uu xilkii Guddoomiyenimo  
ee Maxkamadda Sare ee Jamhuuriyadda Somaliland ka qaado  
Mudane, Yuusuf Ismaaciil Cali.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**QAYBTA SADEXAAD:**  
**DIKREETOYINKA, WAREEGTOOYINKA,**  
**AMARADA & XEER NIDAAMIYAYAASHA**  
**WASIIRADA, IWM:**



**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**  
**REPUBLIC OF SOMALILAND**



**WASAARADA CADDALADDA**  
**MINISTRY OF JUSTICE**

**ARR.GARSOORKA**

**JUDICIAL AFFAIRS**

WC&A.G/XW/G-2/140/15

Date: 26/03/2015

Ku: Radio Hargeysa,

=Hargeysa=

Ku: Telefishanka Qaranka SLNTV

=Hargeysa=

Og: Dhamaan Guddoomiyayaasha Maxkamadaha  
Racfaanka,

=Fadhigooda=

Og: Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

=Hargeysa=

Og: Guddoomiyaha Maxkamada Sare JSL,


=Hargeysa=

Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda,

=Hargeysa=

UJ: FULIN GO'AANO KASOO BAXAY GUDIGA CADAALADDA.

Wasaaradda Cadaaladda ee JSL, iyadoo cuskanaysa Qodobka 106aad ee Dastuurka Qaranka Farqadiisa 1aad, kazoo qeexaya may Wasaaradda Cadaaladdu u xilsaaran tahay Fulinta Go'aanada Guddiga Cadaaladda.



Sidaa darteed, waxaanu halkan ku faafinaynaa Go'aanka lanbarkiisu yahay MS/GGC/G-1/05/2015 ee 21/03/2015.

GUDIGA CADAALADDU WAXAY GO'AAMIYEEN

**Qodobka 1<sup>aad</sup>**

**Magacaabid garsoorayaal**

1. Xasan C/laahi Cawaale, Waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda Degmada Sheekh.
2. C/Salaan Xaashi Cabdi, waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda Degmada Baki.
3. Ilyaas Daa'uud Ibraahim, waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda Saylac.
4. Khaalid Cabdi Shiil Bulaale, waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda Degmada Sabawanaag.
5. Mukhtaar Daahir Jibriil, waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda Degmada Salaxley.
6. C/Casiis Yuusuf Maxamuud, waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda Degmada Dila.

7. C/Wahaab Maxamed Qalinle, waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda Degmada Alaybaday.
8. Maxamed Baasha Xuseen, waxaa loo magacaabay Maxkamadda Degmada Sheekh.
9. Sulaymaan Jaamac Xandule, waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda Degmada Xiis.
10. Cabdi Faarax Ibraahim, waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda Degmada Abdaal.
11. Yaasiin Xasan C/laahi, waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda Dila.
12. Yuusuf Cali Ismaaciil, waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda Degmada Cadaadley.
13. C/Laahi Cumar Sh. Faarax, waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda Degmada Faraweyne.
14. Idiris Muuse Tiigsi, waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda Degmada Daarasalaam.

## **Qodobka 2<sup>aad</sup>**

### **Ka Hawl-gal Xafiiska Garyaqaanka Guud**

1. Farduus Aadan Maxamed, Waxaa loo magacaabay Inay ka Hawlgasho Xafiiska Garyaqaanka Guud.

2. Hoodo Cismaan Xasan, Waxaa loo magacaabay inay ka Hawlgasho Xafiiska Garyaqaanka Guud.
3. Amaal Maxamed Cali, Waxaa loo magacaabay inay ka Hawlgasho Xafiiska Garyaqaanka Guud.

### **Qodobka 3aad**

#### **Ka Hawl-gal Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud**

1. Saahida Cali Jaamac, waxaa loo Magacaabay inay ka hawlgasho Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud.
2. Farax Khadar Nuur, waxaa loo magacaabay inay ka Hawlgasho Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud.
3. Mumtaas Maxamed Ibraahim, waxaa loo magacaabay inay ka Hawlgasho Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud.
4. Najma Cumar Jaamac, waxaa loo magacaabay inay ka Hawlgasho Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud.
5. Gudoon Axmed Maxamuud, waxaa loo magacaabay inay ka Hawlgasho Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud.

ALLAA MAHAD LEH.

Xuseen Axmed Caydiid

WASIIRKA CADAALADDA & ARR. GARSOORKA.



JAMHUURIYADDA SOMALILAND  
REPUBLIC OF SOMALILAND



WASAARADA CADDALADDA  
MINISTRY OF JUSTICE

**ARR.GARSOORKA**

---

**JUDICIAL AFFAIRS**

WC&A.G/XW/G-2/172/15

Date: 12/04/2015

Ku: Radio Hargeysa,

=Hargeysa=

Ku: Telefishanka Qaranka SLNTV

=Hargeysa=

Og: Guddoomiyayaasha Maxkamadaha Racfaanka,

=Fadhigooda=

Og: Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

=Hargeysa=

Og: Guddoomiyaha Maxkamada Sare JSL,

=Hargeysa=

Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda,

=Hargeysa=

**UJ: FULIN GO'AANO KASOO BAXAY GUDIGA CADAALADDA.**

Wasaaradda Cadaaladda ee JSL, iyadoo cuskanaysa Qodobka 106aad ee Dastuurka Qaranka Farqadiisa laad, kaasoo qeexaya inay Wasaaradda Cadaaladdu u xilsaaran tahay Fulinta Go'aanada Guddiga Cadaaladda.

Sidaa darteed, waxaanu halkan ku faafinaynaa Go'aanka lanbarkiisu yahay MS/GGC/G-1/06/2015 ee 07/04/2015.



GUDIGA CADAALADDU WAXAY GO'AAMIYEEN

### **Qodobka 1<sup>aad</sup>**

#### **Magacaabid garsoorayaal**

1. Yuusuf Liibaan Cumar, Waxaa loo magacaabay Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka G/Sanaag.
2. Maxamed C/laahi Kabadhe, waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda Degmada Hargeysa.

### **Qodobka 2<sup>aad</sup>**

#### **Bedel Garsoorayaal**

1. C/Raxmaan Maxamed Mawliid, Waxaa laga bedelay Guddoomiyaha Maxkamada Degmada Hargeysa, waxaana loo bedelay Garsoore Maxkamada Gobolka Maroodi Jeex.
2. Mukhtaar Daahir Jibriil, Waxaa laga bedelay Garsoore Maxkamada Degmada Salaxley, waxaana loo bedelay Garsoore Maxkamada Degmada Saylac.
3. Ilyas Daa'uud Ibraahim, Waxaa laga bedelay Garsoore Maxkamada Degmada Saylac,

waxaana loo bedelay Garsoore Maxkamada Degmada Salaxley.



### **Qodobka 3<sup>aad</sup>**

#### **Ansixin iyo Bedel Ku Xigeeno Xeer Ilaaliye Guud**

1. Aadan Salaad Seed, waxaa lagu ansixiyay Bedelkii loo bedelay ku xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Maroodi Jeex.
2. Yuusuf Biixi Maxamed, waxaa laga bedelay ku xigeenka xeer ilaaliyaha Guud ee Gobolka Saaxil, waxaana loo bedelay Madax Xafiiska Ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee Gobolka Gebilay.
3. Xuseen Cali Khayre, waxaa laga Bedelay Ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Maroodi Jeex, Waxaana loo bedelay Ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Togdheer.

### **Qodobka 4<sup>aad</sup>**

#### **Shaqo Ka Saarid.**

1. Garsoore C/Salaan X. Xirsi, Waxaa laga saaray Shaqadii Garsoorka.

ALLAA MAHAD LEH.

Xuseen Axmed Caydiid

**WASIIRKA CADAALADDA & ARR. GARSOORKA.**

**QAYBTA AFRAAD:**  
**AMARADA & GO'AANADA MAAMUL**



**JAMHUURIYADDA**



**SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

**OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL**

---

TIX:- XIG/JSL/49/2015.

29/03/2015

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwaan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.


**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, SAABIR GENERAL TRADING COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

**Markuu arkay:-** In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of

Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:-**

Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .



Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay shirkada magaceedu yahay, SAABIR GENERAL TRADING COMPANY, Astaanteeduna tahay: - (Baytari) shaqadeeduna tahay Dhoofinta Baytaryada duuga ah (Exporter), xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 29/03/2015

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX: - XIG/JSL/51/2015.

30/03/2015

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwaan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:-** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, DHAMAC CONSTRUCTION COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

**Markuu arkay:-** In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay shirkada magaceedu yahay, DHAMAC CONSTRUCTION COMPANY, Astaanteeduna tahay: - (Guri) shaqadeeduna tahay Dhismaha (Construction), xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 30/03/2015

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

**JAMHUURIYADDA**  **SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

**OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL**

---

TIX:- XIG/JSL/52/2015.

31/03/2015

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwaan Gelinta Shirkadaha. (Sole Proprietorship)

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, HORN AVIATION SERVICE, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

**Markuu arkay:-** In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .



Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay HORN AVIATION SERVICE, **Astaanteeduna tahay:** - (Goobo ay ku dhex wareegsan tahay magaca Shirikadu), shaqadeeduna tahay Bixinta adeegyada Duulimaadyada (Aviation Service and Logistics), xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 31/03/2015

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

**JAMHUURIYADDA**  **SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

**OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL**

TIX:- XIG/JSL/53/2015.

31/03/2015

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.



Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwaan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, HARGEISA NATIONAL TRAVEL AND TOURISM AGENCY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

**Markuu arkay:-** In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay HARGEISA NATIONAL TRAVEL AND TOURISM AGENCY, Astaanteeduna tahay: (Goobo ay ku dhex sawiran tahay Diyaarad magaca shirkaduna ku dul wareegsan yahay), shaqadeeduna tahay Bixinta adeegyada Duulimaadyada (Aviation Service and Logistics), xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 31/03/2015

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)



**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

**JAMHUURIYADDA  SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

**OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL**

---

TIX:- XIG/JSL/54/2015.

06/04/2015

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwaan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, HARGEISA CANADIAN MEDICAL CENTER & CANADIAN DENTAL CLINIC, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

**Markuu arkay:-** In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.



**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

**Wuxuu Diiwaan Geliyey.**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay HARGEISA CANADIAN MEDICAL CENTER & CANADIAN DENTAL CLINIC, Astaanteeduna tahay: - (Xarfaha HCMCCDC), shaqadeeduna tahay Bixinta Adeega Caafimaadka (Medical Services), xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 06/04/2015

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

**JAMHUURIYADDA**  **SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

**OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL**

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwaan Gelinta Shirkadaha (Sole Proprietorship).

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, IFTIN WATER SUPPLY COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.


**Markuu arkay:-** In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay IFTIN WATER SUPPLY COMPANY, Astaanteeduna tahay: - (Beeb Biyo Ka

socdaan), shaqadeeduna tahay Ka Ganacsiga iyo qeybinta Biyaha (Watar Supply), xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 06/04/2015



Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

**JAMHUURIYADDA**  **SOMALILAND**  
**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

**OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL**

TIX:- XIG/JSL/56/2015.

06/04/2015

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwaan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, BRIGHT COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku

cad Qodobka 11aad (2) (a)  
Somaliland Company Law.

**Markuu arkay:-** In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay BRIGHT COMPANY: - (Map-ka Aduunka), shaqadeeduna tahay Ganacsi Guud (General Trading), xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 06/04/2015

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)


**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

---



Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwaan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, MAYDI FRANKINCENSE NATURAL OIL (LLC), oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

**Markuu arkay:-** In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkadda magaceedu yahay MAYDI FRANKINCENSE NATURAL OIL (LLC), Astaanteeduna tahay: - (Dhibic iyo

Magaca Shirkada oo is hoos yaala), shaqadeeduna tahay Ganacsiga Guud (General Trading), xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 06/04/2015



Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

**JAMHUURIYADDA  SOMALILAND**  
**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**  
**OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL**

TIX:- XIG/JSL/58/2015.

11/04/2015

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwaan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, AL-JAMIIL GROUP FOR BUILDING FOR BUILDING & ELECTRIC



MATERIALS TRADING, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

**Wuxuu Diiwaan Geliyey.**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay AL-JAMIIL GROUP FOR BUILDING FOR BUILDING & ELECTRIC MATERIALS TRADING, Astaanteeduna tahay: - (Saddex Xagal ay laabadi dhexda kaga jirto magaca shirkaduna ku dul wareegsan yahay) shaqadeeduna tahay soo Dejinta Allaabooyinka (Importer), xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 11/04/2015

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD 

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX:- XIG/JSL/59/2015.

12/04/2015

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwaan Gelinta Shirkadaha. (Sole Proprietorship).

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, BLUE FIELD MINING COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

**Markuu arkay:-** In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka

11aad xubintiisa 3aad ee Xeer  
Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.



Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay BLUE FIELD MINING COMPANY, Astaanteeduna tahay:- ( Koofiyad iyo Majarafad isku dhex jira, magaca shikaduna ku dul qoran yahay), shaqadeeduna tahay Iibinta iyo dhoofinta Macdanta (Mining Export), xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 12/03/2015

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

**JAMHUURIYADDA**  **SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

**OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL**

TIX:- XIG/JSL/60/2015.

12/04/2015

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwaan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, MAALSAN FINANCIAL SERVICES LTD, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

**Markuu arkay:-** In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay MAALSAN FINANCIAL SERVICES LTD, Astaanteeduna tahay: - (Magaca Shirkada), shaqadeeduna tahay bixinta adeegyadda lacagaha (Fund Management and Micro-finance), xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 12/04/2015.

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD 

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

---

TIX:- XIG/JSL/61/2015.

15/04/2015

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwaan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, HEEMAAL CONSTRUCTION AND CONTRACTING COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

**Markuu arkay:-** In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka

11aad xubintiisa 3aad ee Xeer  
Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.



Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay HEEMAAL CONSTRUCTION AND CONTRACTING COMPANY, Astaanteeduna tahay: - (Xarfaha HCC), shaqadeeduna tahay Dhismaha (Construction), xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 15/04/2015.

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

**JAMHUURIYADDA  SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

**OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL**

---

TIX: - XIG/JSL/62/2015.

19/04/2015

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwaan Gelinta Shirkadaha. (Sole Proprietorship).

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Simaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, BUBAL GENERAL TRADING COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

**Markuu arkay:-** In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay BUBAL GENERAL TRADING COMPANY, Astaanteeduna tahay: - (Ubox uu magaca Shirkadu ku hoos qoran yahay), shaqadeeduna tahay soo dejinta Allaabooyinka (Importer), xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 19/04/2015.

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD 

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX: - XIG/JSL/63/2015.

21/04/2015

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwaan Gelinta Shirkadaha. (Sole Proprietorship).

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, TOYOTA SOMALILAND COMPANY (TS), oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

**Markuu arkay:-** In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka



11aad xubintiisa 3aad ee Xeer  
Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.



Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay TOYOTA SOMALILAND COMPANY (TS), Astaanteeduna tahay: - (Xarfaha TS), shaqadeeduna tahay soo dejinta iyo Qalabkoodaba (Importer and Dealer of Motor Vehicles and Trucks), xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 21/04/2015.

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

**JAMHUURIYADDA**  **SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

**OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL**

TIX: - XIG/JSL/64/2015.

21/04/2015

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwaan Gelinta Shirkadaha. (Sole Proprietorship).

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, S3 ATUOMOTIV LTD, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

**Markuu arkay:-** In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

### Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay S3 ATUOMOTIV LTD, Astaanteeduna tahay: - (Magaca Shirkada oo la soo gaabiyey), shaqadeeduna tahay soo Dejinta iyo ka ganacsiga Baabuurta iyo Qalabkoodaba (Importer and Dealer of Motor Vehicles and Trucks), xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 21/04/2015.

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**



MS/GMRH/G-38/70/2015

29/08/2015

KU: - Dhamaan Guddoomiyeyaasha Maxkamadda Dalka JSL

Ku: - Dhamaan Garsoorayaasha Maxkamadda Ka Hawl-gala Maxkamadda Dalka JSL

OG: - Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL Hargeysa

OG: - Ku Xigeenada Xeer Ilaaliyaasha Guud ee Qaranka JSL Hargeysa

**Ujeedo: Joojin Damiin Qaadis Eedeysanayaasha loo haysto dembiyo qaranku ku dhiban yahay.**

Mudanayaal waxaa beryahan dambe soo ifbaxaya in Garoorayaasha Qaarkood Gacan dhaaf ku sameeyaan masuuliyadda maamul ee Guddoomiyeyaasha Maxkamaddaha iyaga oo fara galinaya gal-dacwadeedyada aan ka soo dhamaan hayadaha dambi badhista iyo Xafiiska xeer illaalinta kuwaas oo geedi socodkooda iyo dhawrista wakhtiyada xeerku u xadiday soo dhamaystirka badhista xil ka saran yahay Guddoomiyaasha oo kaliya.

Hadaba iyada oo lagu dhaqmayo Qodobka 35 ee XHC uma banana Garsooreyaasha in ay marnaba damiin ka qaadaan Eedaysanyeyaasha loo haysto Dembi uu ku dhiban yahay Qaranka JSL.

Sidoo kalena uma banana in ay faro galiyaan hawlaha Geedi socodka Dacwadaha Cigaabta ah, sidaas darteed waxaa la farayaa Dhamaan Guddoomiyayaasha Maxkamadaha kala duwan in ay ka reebatoonaadan damiin siinta Garsugaasha loo haysto dambiyo uu ku dhiban yahay Qaranka JSL xilliga horgeynta Booliska iyo xiliga Garqaadistaba.

Allaa Mahad Leh

Yuusuf Ismaaciil Cali

Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee JSL